


# GUDNIINKA FIRCOONIGA

## AH IYO NEW ZEALAND



**Gudniinka fircooniga ahi waa caado dhaqameed waxyeeleeya in ka badan 200 oo milyan oo ah haween iyo gabdho adduunka oo dhan,aaminsanaanta bulshada iyo dhaqan baaxad wayn ayaa ka taageeray (WHO).**

New Zealand dhexdeeda gudniinka fircooniga ahi maaha caado dhaqameed, si kastaba ha ahaatee waxaa jira halkan haween iyo gabdho ka soo jeeda wadamo lagaga dhaqmo caadada gudniinka fircoonniga ah iyo adeega ka jira halkaa si loo siiyo gargaar caafimaad haweenka ku waxyeeloobay gudniinka fircooniga ah (FGM).

Gudniinka fircooniga ahi wax uu ka soo horjeedaa sharciga halkan, saababtoo ah waxaa laga aaminsan yahay inuu dhibaato ku yahay caafimaadka haweenka iyo gabdhaha, waxaana jira bulsho horkacaysa hindisayaasha socda ee kaa caawinaya ka hortaga gudniinka fircooniga (FGM) inuu dhaco.

## Waa maxay qeexitaanka gudniinka fircooniga ah?

Gudniinka fircooniga ah waxa lagu qeexaa sida dhammaan hababka ku lugta leh goynta, qayb ahaan ama gebi ahaanba xubinta sare taranka haweenka ee banaanka, ama dhaawacyo kale oo loo gaysto xubnaha taranka ee haweenka oo aan ahayn sababo caafimaad (WHO,2020).

**Waxaa jira noocyo fara badan iyo kala duwanaansho gudniinka fircooniga ah, afarta ugu waawayna waa kuwa soo socda:**

**Nooca 1aad Clitordectomy:**
waa goynta qayb ahaan ama gebi ahaanba Kintirka/ama daboolka Kintirka.

**Nooca 2aad Excision:**
waa goynta qayb ahaan ama gebi ahaanba Kintirka iyo dibnaha yaryar.

**Nooca 3aad Inffibulation:**
waa yaraynta daloolka xubinta taranka iyo ku samaynta dabool lagu tolayo, goyntii iyo meelaynta dibnaha gudaha iyo dibada, arrintani waxaa laga yabaa ama aanay lug ku yeelan goynta kintirka iyo dibnaha yaryar.

**Nooca 4aad:**
ee kale waa dhamaan hababka waxyeelada u leh xubinta taranka haweenka oo ay ka mid yihiin, in la dalooliyo, la duro, la kala jiido, ama la jeexo kintirka iyo ama dibnaha in la xoqo, si feejigan oo la gooyo, si loo arko walxaha gudaha siilka.

## Waa maxay waxyeelada gudniinka fircooniga ah?

**Dhibaatooyinka gudniinka fircooniga ah waa ay kala duwan yihiin, iyadoo loo eegayo nooca gudniinka laakiin ay ku jiri karaan:**

**Muddo gaaban iyo muddo dheer** – Dhiigbax, Naxdin, Xanuun, Kaadinta oo dhib noqota, iyo caabuq kaadida, Dhaawaca nudaha taranka iyo kaadi mareenka, caabuq, geeri, caadada oo dhibaato lagala kulmo iyo nabaro fool xun, finan cas cas oo samysma iyo burooyin si tartariib ah u soo baxa oo kora.

**Galmada** – Cabsi, Xanuun, dhibaato la xiriirta xaga dhalmada, yaraanta farxada galmada, ee siilka dhaawac xaga galmada ah iyo caajisnimo.

**Dhalashada Ilmaha** – Waxaa adkaada baaritaanada hababka xilliga uurka iyo dhalmada iyo foosha oo dheeraata, dhiigbax, uurku jirta oo ku harta waqtiga ay dhacaysow dhicin, xanibnaanta dhalmada iyo ilmaha oo dhinta xiliga dhalashada oo neeftu qabato.

**Cilmi nafsiga bulshada** – Cabsi, Aamin darro, khiyaamo, welwel iyo cabsida gudniinka (PTSD) iyo cillad ku timaada galmada.

## Gudniinka fircooniga ahi ma shuruud diimeed baa?

Gudniinka fircooniga ah waxaa ku dhaqmay kuwa raacsan diimo badan oo kala duwan, Muslim, Catholic, kuwa aaminsan ruuxaanta, iyo masiixiyiinta. Qaar ka mid ah bulshada muslimiinta ah ayaa aaminsan in gudniinka fircooniga ahi yahay shuruud diimeed, si kastaba ha ahaatee, inta badan wadamada muslimka ahi ma caadaystaan gudniinka fircooniga ah (FGM), ma jirto wax caddayn ah oo la isku raacsan yahay oo ku jira Quraanka ama (Qoraalo kale oo diimeed) taasoo ah in gudniinka fircooniga ahi yahay shuruud diimeed. Ma jirto waliba daliil sax ah oo ku wajahan gudniinka fircooniga ah kuna jira Sunnaha oo dhahaya waa dhaqankii rasuulka (NNKH). Mid ka mid ah mabaadi'da aasaasiga ah ee islaamka ee laga soo xigtay rasuulka (NNKH) markuu yidhi ha dhibaatayn naftaada iyo kuwa kale" Fariimaha mihiimka ee culimada caalamka ee islaamka ah ay uga hadleen gudniinka fircooniga ah (FGM) waxaa ka mid ah:

- Ma jirto aayad qura oo ku jirta quraanka oo taageeraysa gudniinka fircooniga ah balse waxaa jira dhowr aayadood kuwaas oo cambaareeyey ficilada sida gudniinka fircooniga ah, kaas oo si xun u waxyeelaynaya jirka bini 'aadanka oo faragelinaya abuurta alle.
- Gudniinka fircooniga ahi waxa uu khilaafsan yahay waxbarista islaamiga ah ee xurmada jirka bini'aadanka iyadoo islaamku rumaysan yahay inaanay jirin cid xaq u leh inay jarjarto ama ku keento xanuun ama dhibaatayso jirka bini' aadanka.
- Gudniinka fircooniga ahi xataa qaabka ugu khafiifsan dhib buu keeni karaa maxaa yeelay waxay faragelinaysaa shaqada caadiga ah ee caafimaad qabka.
- Ujeedada iyo qaabdhismeedka ee xubnaha taranka haweenka taasoo ilaahay uu si xooggan u reebay.
- Gudniinka fircooniga ahi waxa uu si xun u wax yeelayaa caafimaadka iyo fayoobida gabdhaha iyo haweenka noloshooda oo dhan iyo ku xad-gudubka xaquuqdooda.

## Maxaa sharciga NZ ka qabaa gudniinka fircooniga ah?

**Waa sharci darro New Zealand dhexdeeda gudniinka fircooniga ahi, waayo waxa uu dhib ku yahay caafimaadka gabdhaha iyo haweenka, sidoo kale New Zealand waa saxeexe heshiis caalami ah oo u aqoonsan in gudniinka fircooniga ahi yahay ku xad gudub xaquuqda aadamaha ee gabdhaha.**

Dhamaan noocyada gudniinka fircooniga ahi waa sharci darro New Zealand dhexdeeda. Wax ka bedelka xeerka dembiyada (Qaybta204A) xataa haddii naagta ama gabadhu ay doonayso in la gudo. Sharcigu wax uu sheegayaa inay tahay sharci darro in la gooyo ama la dhaawaco xubanaha taranka haweenka caadiga ah ee fayoow,dhaqanka uu doono ha ahaado, diimeed, ama aan ahayn sababo caafimaad, taas oo macnaheedu yahay inay ka soo horjeedo sharciga in:

- La gudo naag ama gabar, ama canug dhedig ah
- La tirtiro ama la gooyo qayb kasta oo ka mid ah xubnaha taranka haweenka
- La tolo agagaarka xubinta taranka haweenka
- La jaro kintirka ama qayb ka mid ah kintirka
- La daldalooiyo, la dilaaciyo, la xoqo ama la gooyo qayb ka mid ah aaga xubinta taranka ee haweenka.
- in siyaalo kale loo dhaawaco aaga xubnaha taranka ee haweenka

Iwaxa waliba xadgudub sharci ah in loo diro ama loo habeeyo ilmaha ama qof kasta oo muwaadin New Zealand u dhashay inuu tago dalka dibadiisa si loogu soo gudo ama laga caawiyo, ama ama lagu dhiirigaliyo qof soo guda gudniinka fircooniga ah oo ka baxsan New Zealand. Haddii cidi samayso gudniinka fircooniga ah ciqaabtu waa ilaa 7 sano oo xadhig ah, tani waxay dhacaysaa ama qofku ha sameeyo habka, ama ha caawiyo, ama ha abaabulo qof kale oo sameeya gudniinka fircooniga ah.

## Waa maxay kaalmada ku haboon gabdhaha iyo haweenka la guday?

Xeel dheerayaasha caafimaad ee New Zealand waxay bixin karaan si dahsoon oo xasaasi ah oo xirafadaysan gudniinka fircooniga ah, galmada, daryeelka caafimaad ee taranka ee gabadh kasta ama haweenka soo arkay dhibaatooyinka la xiriira gudniinka fircooniga ah, kala soo xiriir hello@fgm.co.nz si aad u hesho xeeldheerayaasha daryeelka caafimaadka oo kaa caawin kara aaga aad ku sugan tahay.

Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo dhibaatooyinka gudniinka fircooniga ah lagana yaabo inay dhacaan ama aad doonayso warkiisa oo badan la xiriir:

Barnamijka waxbarashada gudniinka fircooniga ah (FGM)
Email: hello@fgm.co.nz
www.fgm.co.nz